

XIRMOOYINKA XIDHMADA KAALMADA WADAJIRKA

AH EE LA SIIYO SOOGALOOTIGA DHOWAAN IMAADAY KING COUNTY

Washington Immigrant Solidarity Network (WAISN) waxay ka kooban tahay isbahaysi kala duwan iyo shabakad ka kooban in ka badan 400 oo hoggaamiyaal soogalooti ah, xulafo, iyo ururro u heellan inay taageeraan soogalootiga ku sugan bay'ad afaf iyo dhaqamo kala duwan leh. WAISN waxay taageertaa ayna awood u dhistaa soogalootiga iyo qaxootiga guud ahaan gobolka Washington iyada oo u mareysa adeegyo toos loo siiyo, dadaallo waxbarasho, abaabulka bulshada, u doodista siyaasadda, iyo lacag ururinta. Waxaan nahay urur aan macaash doon ahayn oo ay hoggaamiyaan soo galooti jinsi qaldan iyo kuwa jinsiga beddelan, oo u heellan kobcinta dhaqdhaqaaq cadaaladeed oo adkeysii leh oona isku xiran oo ay hogaaminayaan soo galootiga. Hadafkeenu waa inaan burburino nidaamyada dulmiga ah oo aan abuurno mustaqbal ay dhammaan soogalootiga ay ku koraan uguna noolaan karaan nolol wanaagsan.



Waa maxay Taageerada La Heli karo?

- Xirmooyin daryeel oo leh agabyada nadaafadda lagama maarmaanka u ah *
- Taageerada inta lagu jiro maxkamada socdaalka iyo dhageysiga boon siinta
- Xogta ku saabsan Ogow Xuquuqdaada ICE, loo shaqeeyayaasha, daryeelka caafimaadka, iyo in ka badan oo loogu talagalay soo galootiga
- Caawimo degdeg ah oo loogu talagalay warbixinnada fulinta socdaalka
- U gudbinta hagitaanada sharciga ee dadka la xidhay iyo deeqda boonka socdaalka ee la siiyo shaqsiyaadka xidhan
- RU gudbinta adeegyada sida kaalmada sharciga madaniga ah, taageerada dhanka kirada, cuntada, saadadka ilmaha, iyo shabakadaha taageerada soogalootiga deegaanka

* Waad ku mahadsan yihiin taageerada wada-hawlgalayaasha bulshada, waxaan awoodnaa inaan bixinno xirmooyin daryeel oo leh agabyada nadaafadda lagama maarmaanka u ah. Qof kasta oo ka socda Gobolka Washington waa lagu soo dhawaynayaa inuu soo waco khadka taleefoonka ee WAISN, laakiin soogalootiga cusub ee King County ayaa mudnaanta la siinayaa marka laga hadlayo xirmooyinka daryeelka.

Yaan Caawin Karnaa?

Khadka Taleefanka ee Difaaca masaafurinta Washington Immigrant Solidarity Network (WAISN) waa khadka ugu weyn kaliyana si gooni ah loogu gaar yeelay u adeegidda soogalootiga iyo qaxootiga gobolka Washington iyadoon loo eegayn xaaladda socdaalka.

Si aad taageero u codsato ka wac khadka taleefoonka WAISN 1-844-724-3737. U sheeg cida kaa qabato taleefoonka in aad codsanayso xirmo daryeel.

Ilo dheeraad ah ka hel WAISN Resource Finder, ilaha kujira diiwaanka macluumaadka gobolka oo dhan, oona laba luqoodlaha ah (Isbaanish iyo Ingiriis) loona hubiyay inay si sahlan u isticmaali karaan soogalootiga: resources.waisn.org

Taageerada dhanka luuqada waa la heli karaa. Dhammaan dadka ka shaqeeya khadka taleefoonka waa dadka ku hadla laba luuqadood oona kala ah Isbaanish iyo Ingiriis.

Hooyada, wakaaladaha, iyo xubnaha bulshada ayaa si toos ah usoo wici kara khadka Taleefoonka.



1-844-724-3737

ISNIIN-JIMCO / 8AM-6PM



WASHINGTON IMMIGRANT
**SOLIDARITY
NETWORK**